**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Wasaaradda Cadaaladda &Arrimaha Datuurka**

## Dulmarka Mawduuca Afaraad

### Maalgelinta Bahda Cadaalad oo ah mid Waarta oo Wax-ku-ool ah

Si Soomaaliya u dhisto nidaam cadaaladeed oo xooggan, hufan, oo la heli karo, waartaana maaha arrin laga muhiimsan yahay—wuxuu yahay laf-dhabarta go'aamisa in dib-u-habayntu sii jirto kadib dukumiintiyada istaraatiijiga ah, isbeddellada siyaasadeed iyo jadwallada deeq-bixiyeyaasha. Hay'adaha garsoorka waxay u baahan yihiin maalgelin la saadaalin karo, hufan, oo ku filan si ay u gutaan shaqadooda laga bilaabo maxkamadaha iyo xeer-ilaalinta ilaa booliska, xabsiyada, gargaarka sharci, iyo adeegyada cadaaladda ku saleysan bulshada.

Maanta, Soomaaliya waxay wajahaysaa farqi weyn oo dhanka maalgelinta ah oo ka jira guud ahaan bahda cadaaladda. Dakhliga gudaha weli waa koobanyahay, miisaaniyadaha la qoondeeyo kuma filna baahiyaha waaxda, waxaana inta badan jira kala duwanaansho u dhexeeya heerarka federaalka iyo dowlad-goboleedyada. Waaxda cadaaladda ee Soomaaliya waxay heshaa oo keliya **0.98%** miisaaniyadda sanadlaha ah ee Dawladda Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha Ka ah DFS (oo u dhiganta **$34.78 milyan** sanadka 2025), taas oo aad uga hooseysa heerarka caalamiga ah ee **3%–5%**.

Deeqaha caalamiga ah weli waa kuwo muhiim ah, balse mararka qaar waa kuwo kala go'an ama waqti-gaaban, taasoo adkaynaysa qorsheynta fog. Haddii aan la helin hab-maaliyadeed oo mideysan oo waara, xitaa nidaamyada sharci ee xooggan iyo dib-u-habayntu si adag uma dhaqan galaan.

Dhismaha waax cadaalad oo maaliyad ahaan waarta wuxuu ka badan yahay oo keliya buuxinta farqiga degdegga ah. Waxay u baahan tahay:

- Kobcinta dakhliga gudaha oo istaraatiiji ah,
- U adeegsiga kheyraadka maaliyadeed ee dadweynaha si hufan oo mas'uuliyad leh
- Xoojinta awoodaha maaraynta maaliyadda,
- Iyo is-waafajin ka dhexeysa mudnaanta dowladda iyo taageerada deeq-bixiyeyaasha.

Waxay sidoo kale u baahan tahay **go'aan siyaasadeed oo joogto** ah si cadaaladda loogu daro mudnaanta miisaaniyadda qaranka—iyadoo loo arko tiir muhiim u ah xasilloonida, amniga, iyo horumarka.

Mawduucan wuxuu dhiirri-gelinayaa wada-tashi qoto dheer oo ku saabsan sida Soomaaliya u dejin karto qaab-maalgelin waara oo ka difaaca hay'adaha garsoorka naxdin dhaqaale, hubanti la'aan, iyo ku tiirsanaan dibadda, isla markaana u beddela maalgelinta cadaaladda mid horseeda adkeysiga qaranka muddada fog.

## Su'aalaha Doodaha ee Mawduuca Afaraad

### Kobcinta Dakhliga Gudaha oo waara ee Waaxda Cadaaladda

### 1. Xoojinta Kheyraad Ururinta Gudaha

Maxay yihiin tallaabooyinka wax-ku-oolka ah ee ay Dawladda Federaalka Soomaaliya qaadi karto si loo kordhiyo dakhliga gudaha ee waara ee waaxda cadaaladda, iyadoo hubinaysa in maalgelintu noqoto mid joogto ah oo waafaqsan mudnaanta qaranka?

Gaar ahaan: sidee Soomaaliya u horumarin kartaa nidaamyo cusub oo dakhli abuura sida:

- In la danabeeyo nidaamyadda maxkamadaha si loo hagaajiyo ururinta lacagaha,
- mideynta ganaaxyada,

- qoondeyn miisaaniyadeed oo lagu dammaanad qaadayo ugu yaraan 3% waaxda cadaaladdu ka heleyso miisaaniyadda Guud ee Dawaladda,
- iyo hab-raacyo siman oo dakhliga loo wadaago hee Federaal iyo mid Dawlad Goboleed si loo taageero adeegyada cadaaladda ee la deegaameeyay?

**2. Islaxisaabtanka iyo Adeegsiga Hufan ee Kheyraadka Dadweynaha**
Sidee hay'adaha cadaaladda u xoojin karaan hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo waxtarka isticmaalka khayraadka dadweynaha, iyadoo la xaqiinayo in ku celcelin aan la samayn ama aan la khasaarin?
Gaar ahaan: maxay yihiin nidaamyada casriga ah ee danabaysan ee maamulka maaliyadda, dib-u-habaynta qaabka iibka, iyo qaabka loo hirgelin karo nidaamka miisaaniyadda ku saleysan waxqabadka si xal loogu helo caqabadaha gaarka ah ee uu waajahayo maamulka maaliyadda guud ee Soomaaliya?
Sidee loo hagaajin karaa isku-xirnaanta booliska, maxkamadaha, xabsiyada iyo adeegyada gargaarka sharci si loo yareeyo ku celceliska oo loo kordhiyo tayada adeegga?

**3. Isku-duwidda Deeqaha iyo Mudnaanta Qaranka**
Maxaa loo baahan yahay si loo hubiyo in taageerada deeq-bixiyeyaasha ay noqoto mid isku-duuban, waqti-dheer, oo la jaanqaadda qorshaha Qaranka ee Dib-u-habaynta Cadaaladda?
Sidee Soomaaliya u xoojin kartaa:

- madalaha isku-duwidda sida Sanduuqa Horumarinta iyo Dib-u-dhiska Soomaaliya,
- hababka maalgelinta isu-ladhan (pooled funding),
- loona guuro maalgelinta ku saleysan barnaamijyada halkii ay ka ahaan lahaayeen mashaariic gooni-gooni ah?

**4. Xaqiijinta Xasiloonida Maaliyadeed ee Qorshaha Muddada Dheer**
Sidee Soomaaliya u dhisi kartaa hay'addo iyo siyaasaddo ilaalin oo dammaanad qaada sii joogteynta maalgelinta waaxda cadaaladda xilliyada kala-guurka siyaasadeed, carqaladaha dhaqaale, ama isbeddello ku yimaadda taageerada caalamiga?
Gaar ahaan: maxay yihiin qaab-dhismeedyada sharci, sanduuqyada maalgelinta fog ama farsamooyin kale oo waara si loo ilaaliyo maalgelinta sanduuqa cadaaladda?

**Su'aalaha daba socda – Ku Habboon Shaqada Khudbad-Bixiyeyaasha**

- **Wasiirka Maaliyadda:** Miisaaniyadda iyo kheyraad ururinta.
- **Wasiiru-dowlaha XPM:** Isku-xirnaanta siyaasadaha iyo waafajinta deeqaha.
- **Guddoomiyaha SDRB:** Maalgelinta hal-abuurka leh iyo iskaashiga gaarka/dawladda.
- **Agaasimaha Ururka Bangiyada Soomaaliyeed:** Ka-qaybgalka ganacsiga, lacagaha dijitaalka ah & maalgelinta muuqata.

**Jawaabaha Qabyada ah — Si Gaar ah Loogu Habeeyay madaxda ka qeyb qaadanaysa doodaha**
**1. Wasiirka Maaliyadda**
**Diiradda: Mudnaanta Miisaaniyadda, Kobcinta Dakhliga & Nidaamka Daadejinta Maaliyadda Dalka**
Mudanyaal iyo Marwooyin,
Maalgelinta cadaaladda ee waarta waxay ka bilaabataa aqoonsiga in ay tahay *adeeg dadweyne oo aasaasi*

*ah*. Wasaaraddaydu waxay hirgelinaysaa saddex arrimood oo muhiim ah:

1. **Inaan ku darno baahiyaha waaxda cadaaladda Istaraatijiyadda Dakhliga ee muddada dhexe**, annagoo soo jeedineyna canshuro gaar ah kiisaska ganacsi ee qiimahoodu sareeyo iyo khidmadaha maxkamadaha oo la saadaalinayo inay keenaan **$8M sanadka 2026**.
2. **Hirgelinta Nidaamka Wareejinta Maaliyadda Federaalka**, oo dammaanad qaadaya in **30%** maalgelinta cadaaladda gaarto dowlad-goboleedyada.
3. **Tijaabinta miisaaniyad ku saleysan waxqabadka**, taas oo **15%** miisaaniyadda ku xireysa heerka natiijooyinka sida heerka kiis-dhammaystirka iyo qanacsanaanta dadweynaha.

Waxaan sidoo kale u ololeynaynaa **wax-ka-beddel Dastuurka** si loo xaqiijiyo ugu yaraan **5%** miisaaniyadda qaranka oo loo qoondeeyo cadaaladda. Tani waa maalgelin lagu dhisayo xasilloonida Soomaaliya.

**2. Wasiiru-Dowlaha Xafiiska RW**
**Diiradda: Isku-xirnaanta Siyaasadaha, Waafajinta Deeqaha & Kormeerka Dib-u-habaynta**
Aniga oo matalaya qorshaha Isbeddelka Qaranka NTP, waxaan ka shaqeyneynaa in maalgelinta cadaaladda ay noqoto mid mideysan:

1. **Guddiga Hagista Cadaaladda** ayaa hadda ku amra dhammaan deeq-bixiyeyaasha inay la jaanqaadaan *Istaraatiijiyadda Dib-u-Habaynta Cadaaladda 2024–2028*. Tani waxay soo afjaraysaa 14 mashruuc oo gooni gooni ah sanadkii hore.
2. Waxaan aas-aasnay **Somali Justice Fund** oo 70% taageerada deeqaha ay ku soo marto nidaamka dowladda.
3. **Hal nidaam warbixineed oo mideysan** ayaa loo adeegsadaa hay'adaha cadaaladda oo dhan, taas oo meesha ka saartay ku celcelisyo badan.

Fariinteennu waa: *Taageera nidaamkeenna, ma aha kaliya mashruucyo gooni-gooni ah.*

**3. Guddoomiyaha Bankiga Horumarinta iyo Dib-u-Dhiska ee Soomaaliya**
**Diiradda: Maalgelinta Hal-abuurka,maalgelin isku dhafan & Ilaalinta Hay'adaha**
Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed wuxuu diyaarinayaa aalado maaliyadeed oo casri ah:

1. **Sanduuqa Maalgeinta Waarta ee Waaxda Cadaaladda** — sukuk muddo 10 sano ah ah oo lagu beegsanayo **$50M** oo loogu talagalay dhismaha maxkamadaha iyo danabaynta nidaamyadda.
2. **Dammaanad-qaad 50% ah** oo la siinayo bangiyada gaarka loo leeyahay si ay u maalgelin karaan shirkadaha yaryar ee teknoolojiyadda sharciga.
3. **Sanduuqa Maalgelinta Cadaaladda ee mudaadda fog** oo lagu bilaabay **$20M**, si loo dammaanad qaado shaqooyinka muhiimka ah xilliyada naxdinta dhaqaale.

Waxaan sidoo kale tijaabineynaa **Pay-for-Success Bonds**, halkaas oo maalgeliyuhu ku helayo abaalmarin marka ay yaraadaan ku-celcelinta dambiyada.

**4. Agaasimaha Ururka Bangiyada Soomaaliyeed**
**Diiradda: Ka-qaybgalka Ganacsiga, Lacagaha danabaysan & Ka-wada qeyb-qaadashada Maaliyadeed**
Bangiyada gaarka loo leeyahay waxay door weyn ku leeyihiin maalgelinta cadaaladda:

1. **Danabaynta lacagaha cadaaladda** — dhammaan 85 banki waa la isku xirey, taas oo kordhisay dakhliga maxkamadaha Muqdisho **35%** sanadkii hore.
2. **Deyn loogu talagalay casriyeynta maxkamadaha iyo hay'adaha adeegga sharciga**, oo ay daboolayaan dammaanad-qaadyada SDRB (illaa **$12M**).

3. **Isku-xirnaanta Zaad, EVC Plus, iyo Sahal** oo kordhisay ururinta lacagaha gobollada **40%**.

Waxaan diyaarinaynaa sidoo kale **Justice Sukuk** oo loogu talagalay maalgelinta qurbe-joogta. Bangiyadu ma aha oo keliya maalgeliyeyaal—waxay yihiin lamaane fulin ah oo dhisaya nidaam cadaaladeed oo casri ah oo aan lacag caddaan ku dhisnayn.